



## Magangalyoddoonkoow:

### Waaxda socdaalku waa ay hakisay barihiid adeegga ee lagu qabanaayay codsiyada shahaadada xuquuqda shaqada

Fayruska Koroona awgiis ayaa waaxda socdaalku waxaa ay hakisay barihiid adeegga ee lagu qabanaayay codsiyada ku saabsan xuquuqda shaqo qabashada qofka magangalyoddoonka ah, laga bilaabo maalinka khamiista ee ay taariikhdu tahay 19.3.2020.

### Shahaadada waxaad qaab qoraal ahaan ah uga soo codsan kartaa Waaxda socdaalka

Haddii aad tahay magangalyoddoon ama shaqo siiyaha qofka codsadaha ah, waxaad shahaadada xuquuqda shaqo qabashada si qoraal ahaan ah uga soo codsan kartaa Waaxda socdaalka.

Haddii aad u baahan tahay shahaadada xuquuqda shaqo qabashada, waxaad buuxisaa foomka ku jira boggayaga internetka. Hagista ama tilmaan-bixinta ku saabsan sida shahaadada loo dalbado iyo qaabka lacagta loo bixiyo, waxaad ka heleysaa bogayaga internetka: [migri.fi/todistuspyynnot](http://migri.fi/todistuspyynnot).

Shahaadada xuquuqda shaqo qabashada waxaan kuugu soo diraynaa cinwaanka boostada ee aad u soo sheegtay Waaxda socdaalka ama xerada qaxootiga. Shahaadada kama heli kartid barta adeegga.

### Warbixin dheeraad ah

- Xuquuqda shaqo qabashada magangalyoddoonka: [migri.fi/turvapaikanhakijan-tyonteko-oikeus](http://migri.fi/turvapaikanhakijan-tyonteko-oikeus)
- Hagista ama tilmaan-bixinta ku saabsan samaynta codsiga shahaadada: [migri.fi/todistuspyynnot](http://migri.fi/todistuspyynnot)
- Kharashka falanqaynta waaxda socdaalka iyo warbixinta lacag bixinta [migri.fi/kasittelymaksut-ja-maksaminen](http://migri.fi/kasittelymaksut-ja-maksaminen)